

Hel caawimaad adiga bixinaya khidmada Medicare

Eeg haddii aad u qalanto Barnaamijka Kaydka Medicare iyo/ama Caawimaad Dheeraad ah!

Laba barnaamij oo kaa caawin kara inaad lacag ku kaydsato Medicare

Haddii aad ka diiwaangashan tahay Medicare, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto barnaamijyo kaa caawinaya inaad lacag kaydsato haddii aad leedahay Original Medicare ama Qorshaha Medicare Advantage -- codsashaduna waa mid fudud:

1. Barnaamijyada Kaydsashada ee Medicare

Haddii aad u qalanto Barnaamijka Kaydka Medicare wuxuu dabooli doonaa:

- Khdimadaha caymiska Part A
- Khdimadaha caymiska Part B
- Lacag bixinada wadaaga ah ee Medicare
- Lacag lagaa jari karo ee Medicare

Barnaamijka Kaydka Medicare ee caawimaada Medicare ee kharashyada Parts A iyo B (Dhaqangal ah Abriil 1, 2024)

	DHAKHLIGA ka yar:
Halkii Qofkii	\$1,752 bishii
	\$21,024 sanadkii
Lamaane	\$2,371 bishii
	\$28,452 sanadkii

FIIRO GAAR AH: Ma jiro baaritaan kheyraad/hanti ah oo Barnaamijyada Kaydinta Medicare (Medicare Saving Programs, MSPs). Tani waxay la macno tahay in aan lagu waydiin doonin inaad xaqiijiso wax khayraad ah sida haraaga koontoda bangiga.

2. Caawimaad Dheeraad ah (sidoo kale loo yaqaan Kabitaanka Dakhliga Hoose)

Haddii aad u qalanto, Caawinta Dheeraadka ah ee Medicare Part D ee daawada laguu qoray waxay dabooshaa:

- Khdimadaha caymiska
- Lacagaha la jaro
- Kharashyada lacag bixinta wadaaga ah qaar
- Daldaloolyada/daldaloolka caymiska

Caawimaad Dheeraad ah ee Medicare Part D (Dhaqangal ah Febraayo 2024)

	DHAKHLIGA ka yar:	KHEYRAADKA ka yar:
Halkii Qofkii	\$1,903 bishii	\$17,220
	\$22,836 sanadkii	
Lamaane	\$2,575 bishii	\$34,360
	\$30,900 sanadkii	

FIIRO GAAR AH: Dadka shaqeeya waxaa laga yaabaa inay helaan dakhli ka sareeya waxa jaantusyadani muujinayaan. Labada barnaamijba, kheyraad kuma jiraan guriga aad ku nooshahay iyo hal baabuur.

Ma rabtaa inaad codsato ama ma u baahan tahay macluumaad dheeraad ah?

Ka wac Khadkayaga Macmiilka ee Caymiska lambarka: 1-800-562-6900

Codso inaad la hadasho La-taliyayaasha Dheefaha Caymiska Caafimaadka ee Gobolka oo dhan (Statewide Health Insurance Benefits Advisors, SHIBA) ee tabaruciin ah ee degmadaada - waxaanu nahay adeeg bilaash ah oo aan eex lahayn.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa websaytka: [www.insurance.wa.gov/shiba](#)

Ma u baahan tahay caawimaad luuqad kale ah?

Waxaan leenahay shaqaale ku hadla:

- Isbaanish
- Filipino/Tagalog

Waxaa laga yaabaa inaan haysano mutadhawiciin SHIBA deegaankaa kuwaas oo ku hadla luuqado kale marka lagu daro Ingiriisiga.

Waxaan sidoo kale isticmaalnaa Language Link®, adeega turjubaanka talefoon ee in ka badan 150 luuqadood.

Dheefaha ka hortag ahaaneed ee Medicare Part B

Haddii aad leedahay Medicare Part B, ka faa'iidayso qaar kamid ah dheefaha ka hortaga ee Medicare oo aan wax lacag ah jeebkaaga ka bixin. Waa kuwan qaar kamid ah adeegyada ka hortaga ah ee Medicare ay bixiso:

- Booqashada Fayo-qabka ee Sanadlaha ah
- Birtaanka Dhumucda Lafta
- Baaritaanka Kansaka Naaska
- Baaritaanka xididada Sambabada
- Baaritaanka Kansaka Xiidmaha iyo Malawadka
- Tababarka maaraynta sokorta
- Talaalada hargabka
- Baaritaanka cayilka iyo la-talinta
- Kala talinta joojinta sigaarka iyo isticmaalka tubaakada

Ka eeg Medicare.gov ama Medicare & You buug si aad u hesho liistada dhamaystiran oo ah faa'iidooyinka ka hortaga.

FIIRO GAAR AH: Baaritaanka daryeel bixiyayaasha ama adeegyada dheeraadka ah waxay kordhin karaan kharashka. Waa inaad buuxisaa shuruudaha caymiska, markaa hubi inaad ka hubiso bixiyahaaga caafimaad maclumaad dheeraad ah kahor intaadan samayn kuwan ama baaritaanada iyo adeegyada kale.

Waxyaabaha ku saabsan SHIBA

SHIBA waa qayb kamid ah Xafiiska Gobolka Washington ee Adeegyada Ilaalinta Macmiilka ee Wakiilka Caymiska (Washington state Office of the Insurance Commissioner). Waxaanu bixinaa caawimo lacag la'aan ah, eex la'aan oo qarsoodi ah Medicare iyo doorashooyinka daryeelka caafimaadka. Waxba ma iibino.

Maanta na soo wac!
1-800-562-6900
www.insurance.wa.gov/shiba



SHIP
State Health Insurance
Assistance Program
Navigating Medicare

Daabacaadan waxaa taageeray Maamulka Nolosha Bulshada (Administration for Community Living, ACL), Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka (U.S. Department of Health and Human Services, HHS) taasoo qayb ka ah deeqda kaalmo lacagta ah oo dhan \$297,384 iyadoo 100 boqol ay maalgalinayo ACL/HHS. Waxaa ku jira waa kuwa qoraagai(yasha) ma mataalaan aragtida rasmiga ah ee, ama taageerada, ACL/HHS, ama Dawlada Maraykanka

Dib loo eegay 9/2024